WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2015

# AF-SOOMAALI

20
15

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE**

**XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTALND**

**Code Number**

**Imtixaanka Fasalka 4aad ee Dugsigaa Sare, 2015**

**Amin 2 Saac Iyo 10 Daqiiqo Oo Akhris Ah**

# AF - SOOMAALI

**TILMAAMAHA IMTIXAANKA**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahah 11 bog, Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Ha ku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imitixaanka
- Hubi in waraaqda lifaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah, jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah

---

**Waxaa iska leh saxaha**

| **Qaybaha** | **Dhibco** |
|---|---|
| Qaybta 1aad | |
| Qaybta 2aad | |
| Qaybta 3aad | |
| Qaybta 4aad | |
| Qaybta 5aad | |
| Qaybta 6aad | |
| Qaybta 7aad | |
| **Wadar** | **%** |

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

Boggan lama saxayo. Waxaa loo baneeyey feegaarka.



©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**Q.1AAD: SHEEKO………………………………………………………………………… 19 DHIBCOOD**

Sheekadaan akhri, dabadeedna ka jawaab su'aalaha ka iman doona.

Waxa ay ahayd Amin subax ah oo ay libdhadu soo falaadhaysay,sharka iyo khayrkuna ay hurdada ka soo wada tooseen .Waxaa ay soo hor martay niman meel fadhiya oo alaabo iibinaya iyadoo laafyaha bidixda katuureysa;waxayna aragtay indhohooda oo iyada siddii saymo qorraxeed uga dusaya,kolkaa si ay uga faa'iidaysato Eegmadooda ayey nimankii ula tagtay xeelad adag.

Waxay ku salaantay salaan wadareed iyadoo uu ninba ninka kale ka hororsanayo la hadalkeeda ,waayo waxay ahayd mid Alle joog iyo Jamaal ugu deeqay.Waxay ku tiraabtay hadalkan soo socda:"waxaan rabaa nin hawl yar ii qabta oo aan siiyo 200 oo doolar"lacagtaas oo sida muuqata tammin lahayd.Waxaa farta taagey nin ka mid ahaa raggii meesha fadhiyey,oo hunguriga lacagta wax kale u weheliyeen,aanse mahadin hororsigii qalanjadii qalbi qaadday.Murti soomaaliyeed ayaa ahayd (**Sidi-sididaada mooyee dhul u dhacaaga hubso)**

Ninkii isaga oo aan ka fekerin waxa dhicidoona uyaa u raacay haweeneydii rugteedii,soo dhoweyn iyo qaddarrin badan ka dib ,waxay u sheegta danteedii, iyada oo hadalkeeda ku bilowday weedhan soo socota:

"Ninkaygii wuxuu aadey dagaal,wuxuuna maqnaa toban sano ilaa iyo waqtigaasna war kama helin. Waxaan ahay gabar aad u da'yar,waxaanna ubaahanahay waxa ay ubaahantahay gabadh aynigayga ahi , oo ku nool noloshaan oo kale.

Haddaba si aan uga boxo dhibta I haysata waxaan kaa codsanayaa inaad ii raacdid Qaalliga, kuna tiraahdid;gabadhani waa Ooridaydii waxaanna ka maqnaa toban sano , haddana waxaan doonayaa inaan furo, ,marka aad arrintaa samaysid ayaan ku siinayaa lacagtaada afarta jiho midaad rabtidna aad murti soomaalieed ayaa ahayd **"(Intaadan falin ka fiirso)**

Sixranaayaa iyo lacagtu si ka dhigtayaaba wuxu aqbalay arrintii loo soo jeediyey,wuxuuna u raacay maxkamaddii, salaan kooban ka dibna waxay tidhi haweeneydii :

"Xaakimow ninkani waa Saygaygii wuxuuna iga maqnaa toban sano ,Alle waa nabad keenay haddana wuxuu rabaa inuu I furo" .

Xaakimkii ma ninkeedii baad tahay? Ninkii wuxuu ku tiraabay haa waxaan ahay ninkeedii maqnaan jirey hadana waxaan doonayaa inaan furo.

Xaakimkii: ayaa gabari weydiiyey oo ku yidhi ma raali baad ka tahay in lagu furo?Gabadhii ayaa intay qosol yar dhag ka siisay tiri haa xaakimow.

Xaakimkii markuu arkay iney qiraal isu yihiin ,ninka iyo haweeneydu aanna loo baahnayn marag iyo milad toonna ,ayaa uu ninkii ku yiri: Haye fur gabadha , oo imaqashii dalqadeeda

Ninkii ayaa yiri: Haye xaakim waxaan ku furay saddex dalqadood oo aan ku noqosho lahayn.

Haweeneydii ayaa mar qura la soo booddey , xaakim ninkaygu wuxuu iga maqnaa toban sano , masruuf iyo marashi midna kama helin ,marka waxaan ka rabaa xaqaygii !!!!!!.

 ©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

Xaakimkii ayaa yiri :Xaaskaaga maxaad u siin weydey xaqeedii intaas oo sano? murti soomaaliyeed ayaa ahayd ( **fari togdheer bay kula xushaa**)

Ninkii ayaa fuqba gar ku dhegey ,wuu tallamay haddaad diiddo waa xarig iyo ceeb,haddaad aqbashana waa lacag badan oo jinni ku saar ah,balse wuxuu qaatay go'aan adag oo wuxuu yiri waan bixinayaa xaakim.

Xaakimkii ayaa qiimayey lacagtii waxayna noqotay 2000 kun oo doollar.

Xaakimkii markii uu qiimaha ogaadey wuxuu ninkii u sheegay,inay gabadhu kursigeeda fadhiyeyso inta xaqeeda looga keenayo,isaguna uu lacagta deg-deg u keeno.

Sir ma qabihii uu hungurigu qaaday ayaa ku orday meeshii uu wax ku ogaa,wuxuuna u keenay si halhaleel ah 2000kun oo doollar,fartana kaga saaray xaakimka hortiisa,iyana waxay ahayd qof xaqa iska ilaalinaysee waxay gacanta midig ka gelisay 200dii boqol oo doollar oo ay kula balantay in ay halaamad u siin doonto marka uu hawshiisa si hufan u guto.Murti dhurwaa ayaa waxay ahayd **(Dayladaan cun is lahaa ma anigii bey I cuntay)**.

**A. Goobo geli jawaabta ugu saxsan ah** **(05 dhibcood)**

1. Saymo qorraxeed waxaa looga jeedaa .

   **a.** Gudcur **b.** Iftiin **c.** Himhimoow

2. Haweeyneeydu waxay nimanka ugu soo leexatay inay :

   **a.** Waxka gadato **b.** Shukaansato **c.** Khiyaamayso

3. Qaalliga xukunkiisu wuxuu ahaa mid ku dhisan hab:

   **a.** Xaq-darro ah **b.** Caddaalad ah **c.** Hubsiino la'aan ah

4. Markii ay naagtu nimanka u timid waxay ahayd ammin:

   **a.** Subax ah **b.** Galab ah **c.** Cawo ah

5. Ninkii naagtu khiyaantay, waxaa lagu xukumay lacag dhan:

   **a.** Laba kun **b.** Labo boqol **c.** Labaatan ku

 ©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**B. Sharrax kooban ka bixi murtiyahan soo socda** **(10 dhibcood)**

1. Intaadan falin ka fiirso

2. Dayladaan cun is lahaa miyaa I cuntay.

Sidi sidi daada mooyee dhul u dhacaaga hubso.

Fari togdheer bay kula xushaa

Hubsiino hal baa la siistaa.

**C. ka warceli weydiimahan hoose** **(04 dhibcood)**

1. Isku day in aad garatid magaca sheekadan kor ku xusan.

2. Si kooban u sharax macnaha dahsoon ee sheekadan.

 ©*PNEB,2015*

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**Q.2AAD: DHAQANKA SOOMAALIDA............................................... 19 DHIBCOOd**

**A. Goobo geli xarafka ka horreeya jawaabta ugu saxsan** (07 dhibcood)

1. Marka hasha la liso caanaha nirigta loo reebo waxaa la yiraahdaa:
   a. Dharaq
   b. Xigsin
   c. Xoox
   d. Godol
2. Geela markaa dhalay waxaa lagu magcaabaa:
   a. Dulcadde
   b. Cashitab
   c. Dhaqayo
   d. Ramag
3. Hasha ama saca irmaan ee aan ogolaan in la liso waxaa lagu magcaabaa:
   a. Hebed
   b. Tood
   c. Badho
   d. Baaqin
4. Socodka habeenkii la socdo waxaa layiraahdaa:
   a. Dhalandhool
   b. Jarmaado
   c. Guure
   d. Carraabo
5. Haweenkii soomaaliyeed ee hore waxa ay dharkooda ku guran jireen:
   a. Danbiil
   b. Kolay
   c. Abxad
   d. Sanduuq
6. Gabadha ninku ka dhinto, haddii ninka walaalkiis guursado maxaa layiraahdaa:
   a. Xigsiisan
   b. Dumaal
   c. Godobtir
   d. Heerin
7. Marka aqal soomaaliga la dhisayo, marka ugu horraysa waxaa la taagaa:
   a. Dhigaha
   b. Loolka
   c. Udbaha
   d. Gurgurka


©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**B. Ka warceli weydiimahan soo socda** (12 dhibcood)

1. Maxaa lagu kala saaraa labo eray oo isku si loo qoro sida **bucad** iyo **burcad**?

   ……………………………………………………………………………………………………

2. maxaa la yiraahdaa dabka laga dhaliyo labo qori oo laysku xoqo?

   ……………………………………………………………………………………………………

3. Maxaa la yiraahdaa marka ay maqasha xooluhu geeda cunidda bilaabaan?

   ……………………………………………………………………………………………………

4. Maxaa loo yaqaan marka ay hooyadu umul nimada ku dhimato?

   ……………………………………………………………………………………………………

5. Marka uu aabbuhu dhinto kana tago ilmo uurka hooyada ku jira, maxaa la yiraahdaa ilmahaas?

   ……………………………………………………………………………………………………

6. Sheeg magaca soomaalidu u taqaan faraska madow?

   ……………………………………………………………………………………………………

**Q.3AAD: NAXWE …………………………………………………………… 10 DHIBCOOD**

1. Qaybaha hadalku waa 8qaybood sheeg labo ka mid ah?

……………………………………………………………………………………………………

2. Maxaa ay ku kala duwan yihiin magac guud iyo magac agar ah?

……………………………………………………………………………………………………

3. Waa maxay magac u yaal?

……………………………………………………………………………………………………

4. Qodobada Afsoomaali waa toddoba qodob, sheeg afar ka mid ah?

……………………………………………………………………………………………………

 ©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

5. Sheeg labo meelood oo uu qoraalka ka galo xarafka weyni?

……………………………………………………………………………………………………………………

**Q.4AAD: ERAYO IYO SARBEEBO…………………………………………….10 DHIBCOOD**

**{***Bari , Gaagax, garudamays , maangad, halaamad, fil, tallan***}**

**A.** Erayadan iyo lidkooda isku aaddi (06 dhibcood)

1. Gaagax _______________
2. Maangal ______________
3. Bogox ________________
4. Curad_________________
5. Hawl _________________
6. Ayni __________________

**B.** Sharax macnaha loo adeegsado sarbeebahan soo socda: (04 dhibcood)

1. Ishii aragtaay baf dheh……………………………………………………………………………..
2. Hadhuubkoodaa buuxsamey………………………………………………………………………
3. Hargaha looma jejebiyo.…………………………………………………………………………….
4. Waa fara madow yahay……………………………………………………………………………

**Q.5AAD: HEES HAWLEEDYO…………………………………………………10 DHIBCOOD**

***Erayadan ku hor qor mid walbaa hees hawleedkiisa***

**{** Xijiga, Badartunka, Idaha, Salsalka, Caanalulka,kalluunka**}**

1. Waa beelo ceebeede yaan subagga lay bidine baayeey bullooy ii bax(…………………………)
2. Awlalka xarkagay ee xayaabada xagga sare ku leh, xaayo mooyee xoolo kale maleh.

   (………………………)
3. Ama maanta deyn baxay oo dalawo geel ka iibsadey,ama daalac layraac oo dibba beeyo uma guro. (……………………………….)
4. Ka cabso mooye cusub, ka cabso tibta culus, ka cabso cududahayga.(……………………….)
5. Allahayoow nin labo raray mid u raabsanaayaa ruux gooya weynaa.(……………………….)


©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**Q.6AAD: GABAY……………………………………………………………………………….. 17 DHIBCOOD**

Gabaygan waxaa tiriyey maxamed kaahin Feeroole1946dii.Maxamed isaga oo aan weligii magaalo tegin oo geel jirenimo ku weynaadey ayuu u dhoofay Yaman, gaar ahaan magaalada Cadan. Abwaanku maadaama uu dhallinyaro ahaa, sababta ugu weyn ee Cadan u tegey waxa ay ahayd in uu shaqo ka helo magaalada. Hase yeeshee, *Waxa ayaan darro ku noqotay in halkii uu tagaba la weydiiyey waxa uu yaqaanno iyo shahaadadda uu haysto nooca ay tahay*.

Markii uu magaalada muddo joogey, shaqana uu gadhaw ka siin waayey, suuqiina uu ku xumaaday, ayaa uu habeen habeennnada ka mid ah caweys gaaf ah oo il-yartu isqabatay, waxa uu ka tiriyey gabay calaacal ah.

Maxamed isaga oo xaaladda dhallinyarada cadan joogta liidaya, kana cabsi qaba in uu sidooda oo kale noqdo haddii aanu shaqo deg-deg ah helin ama dalka iskaga dhoofin, kana calaacalaya tacliin la'aanta aanu hore wax u baranin iyo dhibaatada qurbaha ku haysata. ayaa uu tiriyey gabaygan:

1. Taalloolayaal iyo anoo, taaggi Siraw jooga
2. Toomaha walwaaleed anigoo, torog ku maalaaya
3. Anigoo tusmada reerkayga, talada goynaaya
4. Taajkiyo garoomaha anigoo, laygu wada tiirshey
5. Ayuun baa la ii tumay durbaan, taarna ii yimide

6. Dabadeed tallaabo iyo orod, taw u soo idhiye
7. Tamuunkii ku imid meel jinnaan, lays temmadinayne
8. Tawaahida waxaan lahaa fuluus, tuulan baad heliye
9. Tabtaan ku arkay iyo caynkanay, tahay ma moodeyne
10. Waxa tuban kun tamar laawe, aan tacabba eegayne
11. Talaatiin gu' qaar joogay baan, toob u xaasiline
12. Tanna xoogsi kama soo taraan, taana laga waaye
13. Taf la jiido iyo bay hayaan, tookha dibadeede
14. Teys ma laha taaloogga iyo, timo la xiiraaye


©PNEB,2015
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

15. Aniguna tabtoodii haddaan, tacalliimaayaaye
16. Mar haddaanan teeb iyo waraaq, taybal dhiganaynin

17. Turjubaan afkiisii haddaanan, uga tiraabaynin
18. Mar haddaanan Faaltuu tegiyo, Turugsi raacaynin
19. Kol haddaanan telifoonka iyo, taarka ku hadlaynin
20. Marse hadduu tabtaa yahay raggii, teedhi seben joogay
21. Way talo xumaan xoogsigaan, tan uga jeedaaye
22. Tacliin wuxuu i baray aabbahay, tooyad soo godole
23. Tiska oodda iyo baan aqiin, tirada xoolaaye
24. Intii aan tuldaha jaan wad-wadey, rag iga tooreeyey
25. Waxba gabaygu yuu ila tafine, waxaan ku taalleeyey
26. Mugga waan tegeyaa haddaan, taabo nooliga e'
27. Tabantaabo gacal baan rabaa, tolow ha lay dhoofsho

**A. Ka dooro jawaabta ugu saxsan** **(05 dhibcood)**

1. Gabayga waxaa tiriyey:
   a. Ismaaciil Mire
   b. Sayid Maxamed
   c. Maxamed Kaahin
   d. Raage Ugaas
2. Gabayga noocan oo kale ah waxaa layiraahdaa:
   a. Calaacal
   b. Guubaabo
   c. Baroor diiq
   d. Guhaan
3. Erayga "Torog" waxaa looga jeedaa:
   a. Wan
   b. Hal
   c. Sac
   d. Ri'
4. Abwaanku waxa uu sheegay in uu madax ahaa markii uu dalkiisa joogey, tuducyada tilmamayaana waa:
   a. 1aad iyo 2aad
   b. 2aad iyo 3aad
   c. 3aad iyo 4aad
   d. 4aad iyo 5aad


©PNEB,2015
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

5. Gabaygani waxa uu ku dhiiri gelinayaa dhalinyarada in ay:
   a. Dhoofaan
   b. Tahriibaan
   c. Shaqaystaan
   d. Waxbartaan

**B. Ka jawaab su'aalahan**: (12 dhibcood

1. Waa maxay sababta gabyaaga qurbaha geysey?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

2. Dhallinyaradda qurbaha joogtey oo uu dhaliilay maxuu ku arkay?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

3. Waa maxay sababta abwaanku shaqo u waayey markuu qurbaha tegey?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

4. Sheeg abwaanku tuduca uu ku baryootamayo?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

5. Maxaa ay ku kala duwan yihiin dhoofkii hore iyo kan hadda jiraa?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

6. Maxaa laga looga jeedaa dal shisheeye waa dareen ku joog?

   ………………………………………………………………………………………………………………

   ………………………………………………………………………………………………………………

 ©PNEB,2015

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**Q.7AAD: CURIS……………………………………………………………………………………15 DHIBCOOD**

Curisyadan soo socda mid keliay ka dooro kana qor hal boo o keliya.

1. Ilaalinta deegaanka iyo ka hortagga xaalufka.
2. Farqiga u dhaxayeeya qofka wax bartay iyo kan jahliga ku sugan.
3. Tahriibta iyo ku hungoowga qurbaha.

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………DHAMMAAAAAAAAAAAAAD



©PNEB,*2015*

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com